# Racfaanada SSB

Appeals to SSB

## Ka wadan haddii aanan ku raacsanay go'aan ay gaartay hay'ada SSB?

Adeegyada Gobolka ee Indhoolayaashu (VRS) waxa ay leeyihiin nidaam racfaan qaadasho ah hadii aadan ku qanacsanayn go'aanka ay ka gaartay kiiskaaga. Hadii aad tahay codsade ama jaa aad horey u ahayd macmil waxa aad xaquuq u leedahay:

1. inaad codsato dib u eegid ladifan oo uu sameeyo kormeere oo ka tirsan SSB

    iyo/ama

2. codsi dhexdhexaadin. Taa macnaheedu waa qof sedexaad oo dhexdhexaad ah inuu kala shaqeeyo adiga iyo VRS inaad heshiis gaartaan

    iyo/ama

3. inaad u soo bandhigto daliilo, akhbaar iyo makhraatiyaal mas'uulka aan eexda lahayn ee dacwooyinka qaada. Mas'uulkaasi waxa uu ka dib ka gaari go'aan kiiskaaga.

## Ogaysiiska Xaquuqda Racfaanka

Waxaa khasab inaad ka hesho ogaysiis ku saabsan xaquudaada racfaanka SSB.



- Ogaysiisku waa inuu qornaadaa
- Ogaysiisku waa inuu noqdaa qaabka aad jeceshahay in la adeegsado kolka lagu la soo xiriirayo (af-ajnabi, farta Bariilka, iwm.)
- Ogaysiisku waa inuu kuu sheegaa Barnaamijka Gargaarka Macmilka (CAP) sida (CAP) uu kaaga caawin karo racfaanka.

Waa khasab inaad hesho ogaysiiska xaquuqda racfaanka kolka:

- Aad codsato adeegyada SSB ka
- SSB ay ku geliso habka kala xulashada
- SSB ay go'aansato inaadan xaq u lehayn
- Qorshahaaga Shaqada ee uu kuu gaarka ah (IPE) la sameeyey (sidoo kalana la yiraa EP)
- SSB ay qorshaynayso inay laasho, yareyso, ama joojiso adeegyada aad hesho.

Hadii SSB ay wax ka bedesho Qorshahaaga Shaqada aadna doonayso inaad racfaan ka qaadato taa, SSB waa khasab inay sii wado adeegyada xilliga dacwada racfaanku ay socoto. Adeegyadu waa inay sii socdaan ilaa iyo inta go'aan kama dambays ah laga gaarayo iyadoo la adeegsato dib u eegid ladifan, dhexdhexaadin, ama nidaam weyn oo dacwo qaadid ah. Laakiin adeegyadaasu ma sii socon doonaan hadii aad markii hore ku heshay musuq-maasuq, been sheegid, ama wax kale oo fal dambiyeed ah.

## Noocyada Kale Duwan ee Racfaanada

Hadii aadan ku qanacsanayn go'aanka ay gaartay hay'ada VRS, waxaa jira qaabab kala duwan oo loo xalin karo dhibka. Qaababkaa kala duwan waxaa loo kala qaybiyey 3 nooc oo aasaasi ah:

- Dib u eegid (ama maamul) ladifan
- dhexdhexaadin
- dacwo qaadid eex la'aan ah

Kuwaa ama aha in loo sameeyo wax qaab kala horeyn ah. Hadii si kale loo yiraa, khasab kuguma aha inaad isticmaasho dib eegida ladifan ama habka dhexdhexaadinta ka hor inta aadan codsan dhagaysi dacwo oo weyn.

Waxa aad u baahan tahay inaad ku codsato dhexdhexaadin ama dacwo qaadid dhaxdhexaad ah qoraal ahaan. Ku waydiiso 60 cisho gudahood laga bilaabo maalinta adiga ama wakiilkaagu uu helo ogaysiinta wixii go'aan ah ee ay gaaro Hay'ada SSB Rehabilitation Counselor.



## Nidaamka Dib u Eegida ladifan

Hadii aadan ku qanacsanayn go'aan uu la taliyahaaga xirfadeyntu ka gaaray arrintaada, waxaad racfaan u qoran kartaa Agaasimaha SSB. Dib u eegida ladifan sidoo kale waxaa la yiraa "maamulida dib u eegida."

Waa khasab inaad ku codsato dib u eegida ladifan 60-cisho gudahood ka dib kolka aad go'aanka hesho. Si aad u bilowdo habka dib uu eegida ladifan, warqad u qor kuna hagaaji:

Director of State Services for the Blind
2200 University Ave. W., #240
St. Paul, MN 55114-1840

Xiliga dib eegida ladifan la sameynayo, waxa aad xaq u leedahay inaad la kulanto qofka arrintaada dib u eegaya si aad ugala hadasho sababta aadan ugu qanacsanayn go'aanka. Arrintaada waxaa dib u eegaya kormeere aan qayb ka ahayn go'aankii hore ee arrintaada laga gaaray.

Kormeerahu waa inuu go'aan ku gaaraa 10-cisho gudahood kolka aad codsato racfaan. Waa khasab inaad nuqul qoraal ah aad ka hesho go'aankaa. Go'aanka qorani waa inuu sheegaa asbaabta go'aanka, sidoo kalena waa inuu kuu sheegaa xaquuqdaada rafcaanka ee cusub.

## Dhexdhexaadinta

Dhexdhexaadintu waa qaab loo xaliyo khilaafaadka oo:

- ka caawin kara adiga iyo shaqaalaha VRS inaad xalisaan khilaafkiina ku saabsan baahida iyo adeegyada
- isticmaala, dhexdhexaadiye dhana aan raacsanayn si uu idiin ku hago xal cid walbaa ogolaan karto

Hay'ada SSB waa khasab inay bixiso wixii khidmad dhexdhexaadin ah ama kharashaad kale ah. Dhexdhexaadiyahu loo isticmaalo dhexdhexaadinta arrimaha tababarada xirfadeynta waxaa soo hela Xiriiriyaha Barnaamijka Dhexdhexaadinta arimaha Tababarada Xirfadeynta. Dhexdhexaadiyeyaashu waxa ay khibrad u leeyihiin dhexdhexaadinta waxay kaloo leeyihiin wuxuun aqoon ah oo ku saabsan arrimaha tababarada xirfadeynta. Ma aha iyagu shaqaale ka tirsan hay'ada SSB.

Labadiina mid uun adiga ama hay'ada SSB ayaa codsan kara dhexdhexaadin. . Waa khasab inaad ku codsato dhexdhexaadin 60 cisho gudahood kolka aad hesho go'aanka la taliyaha ka socda hay'ada SBB. Dhexdhexaadintu waa akhtiyaar. Taa macnaheedu waa khasab in cid walbaa ogolaato si ay u dhacdo. Haddii labadiina adiga iyo SSB aad ogolaataan, adiga iyo SSB waxa aad saxiixaysaan foomka *Codsiga dhexdhexaadinta* waxa aadna u diraysaan Xafiiska Dhexdhexaadinta. Waxa aad ka heli kartaa foomkaa la taliyaha xirfadeynta ama Barnaamijka Gargaarka Macmilka (CAP). Wixii kale ee ku saabsan CAP, ka eeg bogga ugu dambeeya ee warqadan xogta arrursan.




Fadhi ayaa la qabtaa ka dibna dhexdhexaadiye ayaa la ma magacaabaa. Inta badan fadhiyadda waxaa balantooda lagu qabtaa 2 cisho gudahood waxa ayna socdaan qiyaastii 4 saacadood.

Waa aad u soo kaxaysan kartaa taakuleeye ama wakiil adigu dhaxdhexaadinta. SSB waa khasab inay keento qof awood u leh inuu go'aan gaaro. Labada qoloba waxay sidoo kale keensan karaan dad og waxa aad u baahan tahay ama leh aqoon gaar ah oo ku saabsan arrimaha kiiska. Laakiin qolyahu waa khasab inay isku raacaan cidda imaan karta dhexdhexaadinta.

Dhexdhexaadintu waxa ay ku bilaabantaa is-barasho. Ka dib, waxaa jiri fursad labada qolaba ay uga hadli karaan sida ay u arkaan arrimaha . Marka xigta, waxaa jiri doona falanqeyn ku saabsan xalka la heli karo. Hadii adiga iyo hay'ada SSB aad heshiis gaartaan, dhexdhexaadiyahu waxa uu kaa caawin karaa idinka inaad qorida heshiiska cid walbaana nuqul ka hesho.

Hadii aydnaan heshiis gaarin waqtiga dhexdhexaadinta waxa aad isku dayi kartaa mid ka mid ah noocyada kale ee racfaanada ah.

## Habka Qaadida Dacwada aan Eexda Lahayn

Hadii aadan ku qanacsanayn go'aanka ay ka gaartay hay'ada SSB arrintaada, waxa aad codsan kartaa habka qaadida dacwadaha ee aan eexda lahayn. Tani waa sida dhagaysiga dacwada maxkamadaha oo kale, laakiin ma aha maxkamadeyn. Dhagaysiga dacwada waxaa qaada xaakim maamulka sharciga qaabilsan (ALI).

Qoraal ahaan ku waydiiso habka qaadida dacwada aan eexda lahayn, **<u>60-cisho gudahood</u>** laga bilaabo maalinta qoraal ahaan lagugu soo ogaysiiyo go'aanka la taliyaha. Warqadaada waa in lagu hagaajiyaa:

Director of State Services for the Blind
2200 University Ave. W., #240
St. Paul, MN 55114-1840

Dhagaysiga dacwada waa khasab in lagu qabto **45-cisho gudahood kolka aad codsado.** Waxa aad xaq u leedahay inuu wakiil kaa noqdo taakuleye. Qareen ka socda xafiiska Xeer-Ilaaliyaha Guud ayaa wakiil ka noqonaya hay'ada SSB xilliga dhagaysiga dacwada.

Waxaad la imaan kartaa wixii akhbaar ah ama makhraatiyaal ah ee aad is leedahay waa ay caawin karaan arrintaada.

Dhagaysiga dacwada ka dib, xaakimka maamulku waxa uu soo saaraa go'aan qoran.

## Dib u eegida gudoomiyaha ee go'aanada xaakimka maamulka (ALJ):

**<u>20 gudahood</u>** ka dib kolka la soo saaro go'aanka qoraalka ah, labada qolo tii rabta ayaa waydiisan karta Gudoomiyaha Waaxda Shaqada iyo Dhaqaalaha ee Minnesota inuu dib u eego go'aanka. Waxaad kaloo soo diri kartaa akhbaar kale xilligan hadii aad is leedahay waxaa dhici karta inay caawiso arrintaada.

Gudoomiyahu ma uu burin karo go'aanka xaakimka maamulka aan ka ahayn inay jiraan "cadeymo shaki la'aan ah" oo ah in go'aanka ay "iska cadahay inuu khaldanaa (aanu qumanayn)." Gudoomiyahu isaga ayaa go'aanka kama dambaysta ah ku gaara 30-cisho gudahood laga bilaabo maalinta la codsado dib u eegida. Go'aanku waa inuu qornaadaa waana khasab inuu ku jirto warbixin buuxda oo ah xukunka iyo asbaabaha go'aanka.



## Dib u eegida dacwada:

Labada qolo kii raba ayaa dacwo madani ka furi kara maxkamad gobol ama mid dowlada dhexe leedahay si ay dib ugu eegto go'aanka gudoomiyaha. Dacwada madaniga ah waa khasab in lagu xareysto **<u>30-cisho gudahood</u>** kolka go'aanka kama adambaysta ah la soo saaro.

Waxaa fiican inaad si degdeg ah ugu hesho caawimaad dhanka sharciga ah dacwadahan oo kale. Waqtiyada xareysiga dacwadahan caynkaan ahi waa qariib.

Go'aanka kama dambaysta ah ee gudoomiyaha wali waa jiri inta dib u eegida dacwadu socoto. Taa macnaheedu waa adiga iyo SSB ba ma xareysan kartaan dacwo madani ah si aad uga hor tagtaan go'aanka kiiskaagu inuusan dhaqan gelin.

## Mashruuca Gargaarka Macmilka (CAP)

Hadii aad tahay macmil ama codsade adeegyada hay'adaha VRS ama SSB, waxa aad wici kartaa Mashruuca Gargaarka Macmilka (CAP) si aad caawimaad uga hesho, hadii aad qabto su'aalo,walaac, ama ashtako ku saabsan adeegyada tababarada xirfadaha. Hay'ada (CAP) **ma bixiso** adeegyo tababaro xirfadeed ah oo toos ah, sida, tacliin, tababarid, ama qalab. Eeg warqadayada xogta aruursan ee *Mashruuca Gargaarka Macmilka*.

CAP waxa ay qayb ka tahay  Xarunta Sharciyada Dadka Naafadda ee MN [MN Disability Law Center (MDLC)]. Wixii akhbaar ah ee kale ee ku saabsan (CAP) ama sida loo codsado adeegyada (CAP), ka wac:

- (612) 334-5970 (agagaarka beledyada)
- 1-800-292-4150 (gobolka oo dhan)

https://mylegalaid.org/disability-law-center/



***Xog Urursan oo ku saabsan macluumaadka sharciga MA AHA talo xagga sharciga. La tasho qareen.*** *Ha isticmaalaan xogtan urursan haddi ay 1 sano ka soo wareegtay xilligii la daabacay. Weydiiso xogtii ugu dambeysay, liiska xogta urursan, ama aad ku hesho habab kale.*

**© 2025 Minnesota Legal Services Coalition. Qoraalkan waa la sii badin karaa waxaana loo adeegsan karaa oo kaliya hab shaqsi ah iyo waxbarasho kaliya. Xuquuqda kale waa mid la dhawray. Ogeysiiskan waa inuu la socdaa nuqul kasta oo la sii daabaco. Dib u daabicidda, sii qeybinta, iyo in loo isticmaalo hab ganacsi ah waa mid si adag loo mamnuucay.**